


Ogow, Ka Fogow, oo Afkaaga Hooyo

Noogu Soo Sheeg Xatooyada Aqoonsiga

SOMALI

Waa maxay xatooyada aqoonsiga?

Xatooyada aqoonsiga waa waxa dhaca marka uu qof isticmaalo macluumaadkaaga shakhsiyeed ama kan maaliyadeed adiga oo aan u fasixin. Waxaa lagaa xadi karaa magacaaga iyo cinwaankaaga, kaarka amaahda ama lambarka koontada bangiga, Sagaalka Lambar, ama lambarka koontada ceymiska caafimaadka, oo waxaa loo isticmaali karaa



- ▶ in kaararkaaga amaahda wax lagu soo iibsado
- ▶ in kaarar amaah oo cusub lagu soo furto magacaaga
- ▶ in magacaaga lagu soo qaato taleefan, in koronto lagu dalbado, ama gaas
- ▶ in shaqo lagu helo
- ▶ in lagu xado lacagtaada canshuurceliska
- ▶ in ceymiskaaga caafimaadka lagu raadsado daryeel caafimaad
- ▶ in ay magacaaga sheegtaan haddii la xirayo

Sidee baan ku ogaan karaa haddii uu jiro qof iga xaday aqoonsigeyga?

Hoos ka akhriso siyaabaha aad ku ogaan karto marka uu jiro qof kaa xaday aqoonsigaga:

- ▶ **Hubso kharashka aad bixineyso.** Ma ku aragtaa kharashaad ah alaab aadan adigu soo iibsan?
- ▶ **La soco xisaabxirka bisha ee koontadaada bangiga. Miyey ku jiraan lacago aadan adigu la bixin?** Miyey ku jiraan isbeddel aadan filaneyn?
- ▶ **Ogow waraaqahaaga boostada. Miyaadan helin waraaqahaaga kharashka?** Ma laguu soo dirsaday kharash aadan weligaa gelin? Ama miyey jiraan waraaq aad ka heshay goobtaada shaqada oo aadan garaneyn?
- ▶ **Raadso warbixintaada sumcadda amaahbixinta.** Miyey jiraan koontooyin ama macluumaad kale oo aadan garaneyn? Si aad u hesho warbixintaada, Warbixinta Sumcadda Amaahbixinta Sannadka kala xiriir taleefankooda oo ah **877-322-8228**, ama booqo barta **AnnualCreditReport.com**. Ka feker in aad qof aad ku kalsoon tahay weydiisato in uu ku caawiyo. Sharciga federaalka ayaa ku siinaya xuquuq aad ku heli karto hal mar oo bilaash kuu ah oo ah warbixintaada sumcadda amaahbixinta 12kii billoodba hal mar oo waxaad ka heli kartaa mid ka mid ah saddexda xafiis ee ka jira dalka oo dhan. (Saddexda xafiis waxay sidoo kale hadda kuu oggol yihiin in aad warbixintaada sumcadda amaahbixinta todobaadkiiba hal mar si bilaash ah uga heli karto **AnnualCreditReport.com**).



Haddii aad haa uga jawaabto mid ka mid ah su'aalaha hoose, qof ayaa laga yaabaa in uu kaa xaday aqoonsigaaga. →

Sidee baan isaga ilaalin karaa xatooyada aqoonsiga?

Xatooyada aqoonsiga waxa ay ku dhici kartaa qof kasta. Si la isaga yareeyo fursadda ah in uu qof kaa xadi karo aqoonsigaaga

- ▶ **Waraaqaha ay kuugu qoran yihiin macluumaadka shahsiga ah waa inaad ilaalisato.** Meel fiican ku xafido wax kasta oo ah dukumiinti rasmi ah sida shahaadada dhalashada, kaarka Sagaalka Lambar, iyo waraaqaha xisaabxirka koontadaada ee bil kasta. Sida mashiinka oo kale u jeexjeex waraaq kasta oo muujineysa macluumaadka shahsiga ah ka hor inta aadan tuurin.
- ▶ **Sagaalkaaga Lambar ha u sheegin qofkii si lama filaan ah kuula soo xiriira.** Xataa haddii uu qof kuu sheegto in uu ka shaqeeyo Maamulka Sagaalka Lambar, IRS, bangigaaga, ama meelo kale oo aad garaneyso. Qofkaasi ma aha waxa uu sheeganayo. Waa qalinshubato.
- ▶ **Xafido macluumaadka aad ku qoreyso intarnetka iyo taleefankaaga.** Isticmaal xarfo wata lambar iyo astaan oo fureyaal kuu ah oo aan qofna maleysan karin. Ku darso habka labaad ee ah xaqijinta taleefanka, sida lambar laguugu soo dirayo farriin ahaan taleefankaaga, markaad heli karto.
- ▶ **Iska eeg kharashka aad bixineyso.** Iska eeg kharashaadka alaabta aadan iibsan, ama kharashka lama-filaanka ah. Waxay noqon karaan calaamad kuu muujineysa xatooyada aqoonsiga.

Sidee u soo sheegaa xatooyada aqoonsiga oo sidee caawimaad ugu helaa afkeyga hooyo?

Haddii aad ka shakiso xatooyo ah aqoonsi, u soo sheeg Hay'adda Danaha Dadweynaha.

- ▶ Soo garaac **877-438-4338** laga bilaabo **9ka ilaa 5ta Wakhtiga Bariga.**
- ▶ Taabo lambar 3 oo dhageyso liiska luuqadaha si aad u soo sheegto xatooyada aqoonsiga iyo si aad u ogaato waxa aad markaas sameyneysa.

Ama qof aad ku kalsoon ka codso in uu kugu caawiyo afka Ingiriiska si aad u soo sheegto xatooyada aqoonsiga **IdentityTheft.gov**. Waxaad heleysaa qorshe ah sookabasho shakhsiyeed oo bilaash ah iyo tallaabooyinka kuugu xiga.



FEDERAL TRADE COMMISSION
IdentityTheft.gov

Nofeembar 2023